Jamhuuriyadda Somalilnad
Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda

MADAXWAYNAHA SOMALILAND

Oo Tababar Usoo Xidhay Dufcadii 2aad Ee Barnaamijka Shaqo Qaran Ee Miisaaniyadda Dawladda Laga Maalgaliyey.

Danjire Magazine

1. Wasiirka H. Maaliyadda JSL Oo Balanqaadyo U Sameeyay Ganacsatada Yar Yar Ee Uu Saameeyay Safmareenka Ah Ee Covid-19

2. Agaasimaha Waaxda Kastamada Somaliland Oo Si Qoto-dheer Uga Xog-waramay qaabka Wasaaradda Maaliyadu Ula Tacaashay Saamayntii Dhaqaale Ee Safmareenka COVID 19-Ka

3. Wax Ka Barro Barnaamijka Dib-U-Habaynta Maamulka Maaliyadda JSL ee PFM Iyo Nidaamka Maaraynta Xogta Maaliyadda Ee 'IFMIS-ka'

Nidaamka Bixinta Cashuurta Macaashka Ganacsiga

Xogside Seddex Biloodle ah

Fariinta Hawlwadeenada Danjire

Danjire waa xog-side sedex-biloodla ah,kaas oo ay soo saarto Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL. Waxaanu dadweynaha kula wadaagnaa wixii xog ah ee aanu muhiim u aragno, anagoo kusoo ururina wixii dhacdooyin ah ee la xidhiidha shaqada aanu u idmanahay.

Wixii talo iyo toosin ah ee aanu ku horumarin karo xogsidahan iyo guud ahaanba shaqada Wasaaradda waxaad nagula wadaagi kartaan Email-ka Wasaaradda: Info@slmof.org ama formka cabashada iyo talooyinka ee Website-ka W.H.Maaliyada www.Slmof.org.

Follow & Subscribe us

Jaantuska : Wadaagayaasha Miisaaniyadda 2020



Kaabayaal-dhaqaale:

- Iibsiga Qalabka Boosaha & Isgaadhsiinta
- Dhismaha Wadooyin & Buundooyin iyo guud ahaan horumarinta Jidadka dalka.
- Dhismaha Aaga Warshadaha (Industrial zone) iyo Xafiisyada Gobolada.
- Dhismaha Shaybaadh-ka xoolaha dalka ka dhoofaya.
- Iibsiga Idaacad cusub.
- Iibsiga Qalabka Kaluunka (qaboojiyayaal iyo baraf dhaliyayaal).
- Mashruuca Diyaarinta Xarumaha ICT-ga, & hirgalinta habab-ka iswada.
- Dhismaha Goobo kaluumaysi.
- Iibsiga Doonyo Kaluumaysi.
- Dhismayaasha xafiisyada dawlada iyo Guryaha Martida Gobolada.
- Mashruuca Horumarinta Madaaradda.

Mashaariicda kale:

- Mashruuca Sahaminta Macdanta & Shidaalka
- Dhismaha Madxaf (National Museum).
- Doorashooyink.
- Horumarinta Gobolada Bari.

Muwaadin si loo meel-mariyo Mashaariic Wax ku ool ah Fadlan Bixi Cashuurta Kugu Waajibtay.

MASHAARIICDA
MIISAANIYADDA 2020-KA

Wasaaradda Horumarinta
Maaliyadda JSL

Lacagta loo qoondeeyay in lagu hirgaliyo Mashaariicda Miisaaniyadda 2020 waa 376,246,245,316 slsh una dhiganta 18.36% waana kuwan hoos ku xusan:

Ciidamada/Amaanka/Nabadgalyada:
- Dhismayaasha saldhigyada iyo Rugaha.
- Dhismaha Jeelasha Boorama, Salaxlay iyo Gebilay.
- Dhismaha taliska Ceerigaabo iyo Cusbitaalka Ciidanka Milatariga.
- Dhismahayaasha xarumaha Ciidanka Dabdemiska Burco, Boorama iyo Wajaale.

Caafimaadka:
- Dhismeyaasha 10 Xanaano (MCH)
- Iibsiga gaadiid-ka gurmadka Caafimaad-ka (Ambulances)
- Iibsiga Mishiinka Kalyaha Cisbitaal-ka Guud ee Boorama
- Dhismaha Xarumo Caafimaad (3 xarumood).
- Dhismeyaal, & balaadhin X. Caafimaad.
- Ibsiga Qalabka Caafimaadka.
- Mashruuca Cisbitaalada Ceerigaabo & Laascaanood.

Biyaha:
- Dhismaha Biyo-xidheeno & iibka Qarbado (6 Mashruuc).
- Iibsiga Riigag.
- Dhismayaasha ceelal cusub iyo dayac-tir kuwo hore.Horumarinta Dhalinyarada, Ciyaaraha & Shaqo Abuurka:
- Mashruuca Sanduuqa H.Dhalinyaradda
- Masharuuca Shaqo Qaran
- Dhismayaasha Garoonadda (Dhawr Mashruuc ayaa ku jira).
- Qabashada Koobka Goboladtda

Waxbarashada:
- Dhismeyaasha Jaamacado (2 Mashruuc ayaa ku jira).
- Dhismaha Dugsiyo Wax-barasho (5 Mashruuc).
- Dhismaha Goobo akhris (Libraries), tiraba 4 Mashruuc.
- Mashruuca Dugsiyadda Dayaxa & Laascaanood Beeraha, Deegaan-ka & Xoolaha:
- Mashruuca Abuur-badinta
- Mashruucyada Beer, Wajaale & Oodweyne
- Mashruuca Dhiraynta
- Mashruuca Beerista Timirta
- Mashruuca Cilmi Baadhista & Fidinta Beeraha
- Mashruuca Badbaadinta Beeraha
- Mashruuca Xog-ururinta Beeraha
- Seerayaasha Ban-Cawl, Cashuura, Qool-caday & Aroori.
- Mashruuca Daryeel-ka Duur-joogta.
- Mashruuca Daawaynat Xoolaha.
- Mashruuca Tijaabada Taranka Xoolaha.
- Mashruuca Xoolo Qaybinta.

Tusmada Xogsidaha

1. Agaasimaha Waaxda Kastamada Somaliland Oo Si Qoto-dheer Uga Xog-waramay qaabka Wasaaradda Maaliyadu Ula Tacaashay Saamayntii Dhaqaale Ee Safmareenka COVID -19Ka Iyo Arimo Kale.....1
2. Madaxwaynaha Somaliland oo xadhiga ka jaray 12 kii KM ee ugu horeeyey ee mashruuca Berbera Corridor.....4
3. Buuga Xogsidaha Cashuuraha.....6
4. Wasiirka H. Maaliyadda JSL Oo Balanqaadyo U Sameeyay Ganacsatada Yar Yar Ee Uu Saameeyay Covid19-ku 8
5. Madaxwaynaha Somaliland Oo Tababar Usoo Xidhay Dufcadii 2aad Ee Barnaamijka Shaqo Qaran Oo Mihiimad Wayn Ugu Fadhiya Qaranka.....10
6. Muwaadin Wax ka barro Noocyada Tacriifadaha.....13
7. Cashuurta Laga Reebayo Ma-Daganayaasha (Withholding Tax).....15
8. Buug-yaraha Miisaniyadda & Muwaadinka Somaliland 2020 ka.....16
9. Nuxurka Waxyaabihii U Qabsoomay Mudadii Koobnayd Ee Ay Jirtay Waaxda Iibka ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL.....18
10. Waaxda Cashuuraha Berriga Wasaaradda H. Maaliyadda JSL : Su'aalo Iyo Jawaab-Celinta Nidaamka Bixinta Cashuurta Macaashka Ganacsiga.....20
11. Shaqaalaha Wasaaradda Maaliyadda Ee Gobaladda Galbeedka Iyo Barriga Dalka Oo La Gaadhsiiyey Agabka Ka Hortaga Xanuunaka COVID-19 ka.....21
12. Waaxda Baadhista Ee Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Oo Loo Qabtay Tababar Ku Saabsan Haalbeegyada Caalamiga Iyo Anshaxa Saraakiisha Hanti-Dhawrka Gudaha.....23
13. Wax Ka Baro Barnaamijka Dibu-Habaynta Maamulka Maaliyadda Somaliland Ee PFM-ka.....26

Agaasimaha Waaxda Kastamada Somaliland Oo Si Qoto-dheer Uga Xog-waramay qaabka Wasaaradda Maaliyadu Ula Tacaashay Saamayntii Dhaqaale Ee Safmareenka COVID -19Ka Iyo Arimo Kale

Hargeisa, July 01, 2020 (W.H.M)- Agaasimaha Waaxda Kastamada ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL Md **Maxamed Nuur Maxamuud** oo todobaadkan u waramayey Warsidaha ay soo saarto Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL ee DALJIRE ayaa si qotodheer uga xog-waramay qaabka ka wasaaradda Horumarinta Maaliyadu ula tacaashay saamayntii dhaqaale ee xanuunka Safmareenka ah ee duniddii dhaqaalaha haysatay jahawareerka ku riday, kaas oo sheegay in gunti-jiis badan oo wasaaradda horumarinta maaliyadda Somaliland samaysay darteen aakhirkii la xakameeyey hoos u dhicii dakhliga ee la filayey markii hore.
waraysigiisaasi oo dhinacyo badan taabanaya ayaa isagoo dhamaystiran waxa uu u dhignaa sidan:-

S: Agaasime, Furdaduhu/ Kastanadu waa isha ugu mudan ee dakhligu kasoo xaroodo dalka; iyadoo aynu ognahay mihiimada ay qaranka u leeyihiin Kastamada, hadana waxa guud ahaan dunida ka dhacay culays dhaqaale oo uu sababay Xanuunka Safmareenka ah ee COVID 19, ka Waax ahaan saamayn intee leeg buu idinku yeeshay xanuunkaasi?
J: Dabcan culayskasta oo dhaqaale oo dunida ka dhacaa wuu ina saamaynayaa oo dunidii xidhiidh fiican baynu la leenahay oo dhinacyo badan taabanaya, hadii aan usoo noqdo arinta xanuunka safmareenka ah iyo saamaynta uu inagu yeeshay, saamaynta COVID 19-ka ee dakhligu waa wax jira inkastoo sidii la filayey aanu noqonin oo gunti-giijis badan iyo dadaalo badan oo Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL samaysay

5-HANNAANKA KALA WAREEJIMAHA MADAX XIGEENADDA (BUDGET TRANSFER)

Hannankan waxa loo adeegsadaa marka la rabo miisaaniyada ugu jirtay madax xigeen cayiman in loo wareejinayo madax xigeen kale. Kala wareejimuhu inta badan daba socdaan marka ay jirto dib u celin qoondo (Reduction Warrant). Kala wareejimihu waxa ay ka bilowdaan wasaarad ama hay'ad kala wareejinta rabta waxa ansixiya xafiiska miisaniyadda ee Wasaradda Maaliyada waxa u dambeeya oo ansixiya xafiiska hanti-dhawraha guud.

KALA WAREEJINTA MIISAANIYADDA MADAX-XIGEENADDA (BUDGET TRANSFER)

6-HANNAANKA MAAMULIDA KHARASHAADKA (EXPENDITURE MANAGEMENT)

Hannankan waxa lagu maamulaa kharashaadka maalinlaha ah ee la galo.
Hannaakan waxa uu sahalaya in wasaaraddaha iyo hayaddaha dawladu ay si fudud ugu maamushaan kharashaadkooda.
Waxa ay si fudud u ogaan karaan qaabka kharashaadkooda ay u isticmaaleen, maddax xigeenadda uu ka baxay, meelaha uu ku baxay iyo hadhaaga u yaala, Hannaankan waxa uu toos ugu xidhan yahay hannaanka qoodaynta miisaaniyadda mana ogolaanayo in lala baxo kharash ka badan qoondooyinka loo ogalaaday.
Hannaankan waxa uu ka bilowda wasarrad ama hay'ad waxana uu ku dhamaada xafiiska xisaabiyaha guud ee qaranka.

KALA WAREEJINTA MIISAANIYADDAMADAX-XIGEENADDA (BUDGET TRANSFER)



La Soco.....

3-HANNAANKA ABUURIDA QOONDO GOBOLEEDKA (DEPARTMENTAL WARRANT)

Hannaankan waxa lagu abuuraa qoondada miisaaniyeeda wasaradaha iyo hay'aduhu u diraan xarumaha ay ku leeyihiin gobollada dalka. Qoondo gobaleedku wax ka go'adda qoondada guud ee loo abuuray madax xigeen cayiman. Kharashaadkooduna waxa ay ka baxaan goboladda dalka. Hanaankan waxa uu ka soo bilowdaa wasaraada ama hay'adda diraysa qoondo gobaleedka, waxa hubiya xafiiska hanti-dhawrka guud waxa ugu dambayn ogalaada qaybta hubinta ee xafiiska xisaabiyaha guud.

HANNAANKA ABUURIDDA QOONDOOYINKA (WARRANTS)

4-HANNAANKA DIB U CELINTA QOONDATA (REDUCTION WARRANT)

Hannankan waxa uu kuu ogalanayaa in qoondo hore loo abuuray dib loogu celiyo miisaaniyadda guud isaga oo yaraynaya qoondada horay loo abuuray kordhinayana miisaaniyadda. Hannaanka dib u celinta qoondada dariiqa uu maraa waxa uu caksi ku yahay hannaanka abuurida qoondada. Waxa uu ka bilaabma Wasaaradda/Hay'ad waxa soo hubiya madaxa hubinta ee xafiiska xisaabiyaha guud waxa ansixiya qaybta hubinta ee xafiiska hanti-dhawraha waxa u dambeeya oo ansixiya hanti-dhawraha guud. Sidaas ay dib ugu noqotaa qoondadaasi miisaaniyadda guud.

HANNAANKA ABUURIDDA DIB U CELINTA QOONDADA (REDUCTION WARRANTS)



darteed lala tacaalay culaysyadaasi, iyadoo sida aynu wada ognahay cashuurta maceeshadda daruuriga ah hoos loo dhigay 20%, isla markaana cashuur dhaafka loo sameeyey alaabooyinka la xidhiidha xanuunka safmarka ah ee Coronavures, isla markaana iyadoo qaadka oo dakhli badani inaga soo gali jiray la joojiyey muddo 25-ka cisho ah si loo daryeelo caafimaadka bulshadda oo loo xakamaeeyo faafista COVID 19-ka.

Markaa guud ahaan arimahaas oo dhami waa saamayn jirta oo dhaqaalaheena oo kaliya ma ahee COVID 19 dahkhligii guud ee dunidda ayuu hoos u dhac wayn ku keenay oo waa culays dhaqaale ama Jug wayn oo ku dhacday dhaqaalihii dunnida. Iyadoo marka dakhligeena la eego Somaliland ahaan hoos u dhicii la filayey inuu ku yimaado dakhligii ku talo-galka miisaaniyadda 2020-ka sidii la filayey muu noqonin Ilaahay mahadi ha ka gaadhee.

S: Adeegyo ayaad u haysaan Bulshadda, waxaad shaqo joogto ah la leedihiin ganacsatada ama cashuur bixiyayaasha oo aynu ognahay mihiimada ay qaranka u leeyihiin, ha ahaadaan kuwo wax lasoo dagaya ama kuwo dhoofinaya, maxaad ku tilmaami lahayd xidhiidhkiina?

J: Run ahaantii xidhiidhka ganacsatada aanu la leenahay aad ayuu u fiicanyahay, waxaana naga dhaxeeya xidhiidh si wayn u kobcaya oo kalsooni ku dhisan, waxaanu u qabanaa adeegyo badan oo wanaagsan, isla markaana waxaanu marwalba heegan u nahay inaanu baahiyahooda iyo adeegyada ay u baahan yihiin aanu si fiican u fulino, anagoo marwalba ka duulayna kulamada wada-tashiga ah ee aanu marwalba la yeelano ka wasaarad ahaan. Markaa xidhiidhkaas anaga iyo ganacsatada noo dhexeeya waxaan ku tilmaami karaa inuu marayo wakhgtigiisii ugu wanaagsanaa.

Waxaananu sidoo kale marwalba ku dadaalnaa inaanu ganacsatada wax kala soo dagaysay kastamada dalka inaanu ula dhaqano sida ugu muxtarimsan, uguna sharafta badan, waxaana noo qorshaysan ka wasaarad ahaan inaanu kor u qaadno adeegyada aanu ku daryeelayno ganacsatada iyo guud macaamiisha aanu u shaqayno.

S: Dabcan meel shaqo ka socoto cabasho lagama waayo, sideed ula tacaashaan cabashada macmiilka?

J: Waa run meel shaqo ka socoto cabasho lagama waayayo, xafiis ahaan waxaanu sameynay xafiis qaabilsan cabashooyinka ganacsatada, xafiiskaa oo si joogto ah u howl gala ayey ganacstadu usoo gudbiyaan wixii cabasho ah ee ay qabaan, ka dib cida ay khusaysaa waxay ku khasban tahay inay degdeg uga jawaabta cabashadaasi, waxaanan is leeyahay run ahaantii shaqada xafiiskaasi qabtaa waxay si wayn kor ugu qaaday kalsoonidii ganacsatada oo iyagu marka hore kalsooni badan aan ku qabin in cabashadooda wax laga qabto, waxaanu u sheegaynaa anigoo ka faa'idaysanaya fursadan isla markaana jecel inaan Warsidaha Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL ee DALJIRE inaan uga faa'idaysto fariintayda oo aan halkan uga iclaamiyo ganacsatada inay xafiiska cabashooyinka u soo gudbiyaan wixii cabasho ah ee ay qabaan.

S: Guud ahaan waxa dalka ka hirgalay nidaamka dibu-habaynta maamulka & maaliyadda ee PFM-ka loo yaqaan, Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL waa laf-dhabar ka dibu-habaynta, iyadoo Waax kastaa kaalin ku leedahay hirgalintiisa, maxaad nooga sheegi kartaa ilaa hada waxa idiinka hirgalay iyo isbedelada uu idiinku soo kordhiyey nidaamkani?

J: Xafiiska Dib-u-Habaynta Maamulka Maaliyadda ee PFM-ka ee Wasaaradda Maaliyadda JSL waxa naga dhaxaysa wada-shaqayn aad u wanaagsan, waxaanan isleeyahay waxa nidaamka dib-u-habaynta maamulka maaliyadda faa'idada iyo waxarka ugu badan waxa ay ugu jirtaa waaxaha dakhliga, iyadoo dhamaan waaxaha kala duwan ee wasaaradda ay kaalmo mihiim ah ku wada leeyihiin. Hadii dhawr qodob kaaga taabto waxyaabaha uu xafiiskaasi nagala shaqeeyo:-

A. Shuruucdii kastamada waxay ku sameeyeen dib u habayn ,

B. Systemka-lagu shaqeeyana waxbadan ayey ka qabteen, waxna way u hadhsanyihiin oo gacanta ayaa lagu hayaa,

C. sidoo kale tababaro mihiim ah ayey shaqaalaha waaxda kastamada siiyeen, waxaanan rajaynayaa in dadaaladaas PFM-ku ay halkaasi kasii socon doonaan oo mustaqbalka dhaw dalkeenu ka faa'idi doono Insha Allaah.

S: Waxa jira cashuur bixiyaal wanaagsan oo si wadani-nimo leh u bixiya cashuurta sharcigu ku waajibiyey, dabcan dhawrjeer tiraba madaxda wasaaradda u saraysaa way u mahadnaqeen cashuurbixyaasha wanaagsan, ka Waax ahaan maxaad nooga iftiimin kartaa nidaamka aad ku kala saartaan cashuurbixyaha xun iyo midka wanaagsan?
J: Waxa jira nidaamo badan oo lagu kala saari karo cashuur-bixiyaha wanaagsan iyo ka aan si fiican u bixinin cashuurta sharcigu ku waajibiyey, markaa waxa ka mid ah waxyaabaha aanu ku kala saarno Diwaano iyo foomam sharciya oo marka hore lagu kala qoro.

S: Agaasime, waxa isku shaan-dhayn laxaadleh lagu sameeyey madaxda iyo hawl-wadeenadda Kastamada, dabcan waxa sidaa loo sameeyey si loo dardar-galiyo horana loogu dhigo wax soo saarka Kastamada iyo habsami u socodkooda shaqo, waxaad tahay masuulka uga wakiilka ah madaxda sare ee Wasaaradda Waaxdan, maxaad filaysaa inuu is-bedelkaas soo kordhiyo?
J: Guud ahaan, waxaa iska caada ah,in shaqaalaha laysku bedelo , taasina inta badan is bedel ayey ayey ku keentaa dakhliga, waxaanan filayaa in isbadalkaas madaxda wasaaradu samaysay uu noqdo mid sidii la rabay kor u qaada dakhliga, isla markaana wanaajiya shaqada qaranka ee loo igmaday masuuliyiintaasi.

S: Maxaa ka jira in kharashka Koontarabaanka kaga baxa ganacsatada inuu mararka qaar ka bato cashuurta ay ka baxsanayaan?
J: Dabcan waxa run ah in marmarka qaar ay dhacdo in qofka isku-daya inuu ka dhuunto cashuurta in kharashka dhuumashada iyo ka baxsashada cashuurta kaga baxaa inuu ka bato cashuurta caadiga ah ee sharcigu ku waajibiyey ee qofkaasi ka baxsanayo, markaa waxaanu u sheegaynaa cidkasta oo isku dayda inay xoolahooda xalaashadaan oo ay bixiyaan cashuurta ku waajibtay oo marwalba uga hawlyar ugana ixtiraam badan kharashka kaga baxaya koontara-baanka, haddiise qofka la qabto isagoo cashuurta ka baxsanaya dabcan way kaga badanaysaa marwalba oo ganaaxa sharcigu jideeyey baa ku dhacaya alaabtiisa.

S: Alaabta aad qabataan iyadoo si sharci daro ah kusoo gasha dalka maxaa laga yeelaa oo idiinka meelyaala?

J: Koontara-baanku waa laba nooc, kuwaas oo kala ah:- mid dalka ka mamnuuc ah iyo mid dalka laga ogolyahay, markaa midkasta waxa loo raacaa waxa uu sharcigu dhigayo ee uu ka qabo.

S: Waxa jira meelwalba gaar ahaan Waaxda Kastamada Shaqaale si fiican u guta shaqada loo igmaday iyo kuwo aan si wanaagsan u gudanin waajibkiisa sideed u kala saartaan?
J: Taasi way fududahay oo waxa jira form la yidhaahdo formka qiimaynta wax qabadka shaqaalaha oo sandkiiba mar la sameeyo, kaas ayaan ku kala saarnaa oo shaqaalaha wanaagsan-na lagu abaalmariyaa, mid shaqada dayaca ee aan sidii la rabay uga soo bixina lagu ogaadaa, iyadoo mid walba talaabada laga qaadayo loo marayo wado sharci ah.

1- HANNAANKA DIYAARINTA& QORSHAYNTA MIISAANIYADDA (BUDGET PLANNING & PREPARATION)

Hanaankan waxa uu sahlayaa in si fudud loo diyaariyo loona qorsheeyo miisaaniyadda qaranka iyada iyada oo la adeegsanayo Summada Caalimaga ah ee Madax xisaabeedka (Standard Chart of Accounts). Hannaankan waxa uu suurto galinayaa in wasaarad iyo hay'ad kast loo dajiyo xadid miisaaniyadeed oo aanay dhaafi Karin falanqayn iyo dood ka dib (Budget Ceiling).
Hannaankan ayay wasaarad iyo hay'ad kast ku dalbanaysaa qorshaheeda miisaaniyadeed ee sannadka markaas oo ansxinta u dambays ay yeelan doonto golaha wakiilada.
Hannaanka waxa kale oo uu suurto galinayaa in wasaaradaha iyo hay'adaha dawladu ay ka daabacn karaan buugga miisanayada sanadka.

HANNAANKA DIYAARINTA MIISANIYADDA

2-HANNAANKA QOONDAYNTA MIISAANIYADDA (WARRANTS & SUB WARRANTS)

Ansixinta miisaaniyadda sannadka ka dib hannaankan waxa uu sahlayaa in la abuuri karo qoondo saddex bilood ah. Hannaankan waxa uu ku tiirsan yahay hannaankii ka horeeyay ee diyaarinta iyo qorshaynta miisaaniyadda, lamana samayn karo qoondo ka badan miisaaniyadda guud ee sannadkaas. Hannaanka qoondaynta miisanayadda wuxuu u suurto galinayaa in la jajabasado miisaaniyadii sannadka iyada loo qaybinaya afar saddex bilood. Hannaankan waxa kale oo lagu Abuuri karaa qoondooyinka loogu talo galay goboladda dalka.
Hannaankan waxa uu ka bilawdaa wasaaradda ama hay'adda miisaaniyadda (Budget) iska leh. Waxa ansixisa waaxda maaliyadda ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda waxaana ugu dambeeya oo ansixiya xafiiska hanti-dhawrka qaranka.

HANNAANKA ABUURIDDA QOONDOOYINKA (WARRANTS)

NIDAAMKA MAAREYNTA
XOGTA MAALIYADEED EE SOMALILAND (SL-FMIS)

Somaliland Financial Management Sytem (SLFMIS) waa nidaam loogu talo galay in lagu maareeyo maaliyadda dawladda Somaliland. Nidaamkan waxaa loogu tallo galay in uu kaydiyo xogta maaliyadeed ee qaranka si looga heli karo warbixino iyo xisaab-xidh maaliyadeed oo hufan oo dhamaystiran. Ujeedooyinka laga leeyahayna waxa ugu waawaayn:

- *In uu kor u qaado wax ku oolnimada (effectiveness) adeega maaliyadeed hay'adaha kala duwan ee dawladda.*
- *In uu kor u qaado isla xisaabtanka iyo daah-furnaanta dhamaan macaamilka maaliyadeed ee dawladda.*
- *In uu yareeyo khalaadadka ka iman jiray habkii hore ee qalinka iyo waraaqda ahaa isla markaana kor u qaado saxnaanta iyo sugnaanta xogta kordhiyona xawaaraha wadaaga xogta maaliyadeed ee dalka.*
- *In uu yareeyo kharashaad iyo wakhti aan munaasib ahayn oo ku bixi jiray isu-socodka xafiisyadda ee dalka heer degmo iyo heer gobolba.*
- *In la helo warbixinno tiro iyo tayoba leh oo ku salaysan dakhligii la helay iyo kharaskii la galay isla goortaa iyo goobtaa la taagan yahay.*
- *In warbixinahaas loo heli karo qaab shaxaysan (Dashboard) isla wakhti xaadirka la joogo (Real time).*

QAAB DHISMEEDKA SL-FMIS



Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda
Jamhuuriyadda Somaliland

Madaxwaynaha Somaliland oo xadhiga ka jaray 12 kii KM ee ugu horeeyey ee mashruuca Berbera Corridor

Jidka Berbera Ilaa Wajaale Ayaa La Filayaa Inuu Si Wayn Uga Qaybqaato Isku-Xidhka & Koboca Ganacsiga Somaliland Iyo Ethiopia

Hargeisa, July 01, 2020 (W.H.M)- Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland, Mudane Muuse Biixi Cabdi, ayaa 1-dii bishii June 2020-ka xadhigga ka jaray 12KM ee ugu horeeyey jidka weyn ee Berbera ilaa Wajaale ee Berbera Corridor, mashruucan Berbera Corridor ayaa guud ahaan dhan 241KM, waana qaybtii kobaad ee la dhamaystiro.

Sidoo kale talaabadan ayaa ka turjumaysa dadaalada Dawladu ugu jirto horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha.

Mashruucan oo mihiimad wayn ugu fadhiya guud ahaan Qaranka, isla markaana ka mid ah mashaariicda naadirka ah ee ka hirgalay guud ahaan Gobolka, wuxuu fududayn doona isku xidhka ganacsiga ee Somaliland iyo wadamada jaarka ah, gaar ahaan Somaliland iyo Ethiopia.

dhinaca kale mashruucan mihiimka ah ee Berbera Corridor ayaa la filayaa inuu abuuro saaxad maalgashi oo ay ku soo dhiiran karaan Maalgashadayaasha caalamiga ahi.

Ugu horrayn Eng. Tahir Mehmood oo ku hadlayey magaca shirkadda Nael Bin Harmal Hydro export Establishment (NBHH) ee dhismaha fulinaysa dhismaha waddada Berbera Corridor, ayaa ku dheeraaday heerarkii kala duwanaa ee ay waddadu soo martay, waxaana uu tilmaamay inay ka go'an tahay dhammaystirka Waddada Berbera Corridor oo muhiim u ah guud ahaan dalka Jamhuuriyadda Somaliland.

Wasiirka wasaaradda Gaadiidka iyo horumarinta Jidadka, Mudane Cabdilaahi Abokor Cismaan, ayaa isaguna faahfaahiyey isbeddelka dhinaca tayada iyo cabbirka ah ee waddada ku yimi iyo waxyaabaha ay kaga duwan tahay waddadii hore loo mari jirey oo ahayd mid kooban isla markaana in badan la adeegsanayey, waxana isaga oo arrimahaas ka hadlaya uu yidhi,"Maanta waxa aynnu u joognaa inaynnu furno qayb kamid ah mashruucii Berbera Corridor oo ah 12 KM, waddadani madaxweyne way ka duwan tahay waddadeenii hore, jidkii hore wuxuu ahaa Lix Tone (6), tannise insha allah waxay noqon doontaa 40-tone iyo wax ka badan inay xammisho, sidoo kale waa la ballaadhiyey oo ballaceedii hore waxa uu ahaa 6.5, imikana marka hareeraha lagu daro waa 11.3, waxana aannu rajaynaynaa inay insha Allah mustaqbalka ay inoo soo bixi doonto waddo aynu ku raysanno."

Wasiirku waxa uu sheegay in -١٢ka KM ee haatan dhammaaday ay u furan yihiin isticmaalka bulshada gaadiidleyda ah ee jidka maraysa.

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland, Mudane Muuse Biixi Cabdi, ayaa masuuliyiinta wasaaradda Gaadiidka iyo horumarinta jidadka ku bogaadiyey dedaalka ay ugu jiraan dhammaystirka waddada Berbera Corridor, shaqo-wanaagga iyo isku duubnida ay muujiyeen, waxana isaga oo arrimahaas ka hadlaya uu yidhi,"Wasaaradda Jidadka iyo gaadiidka aad baan ugu mahadnaqayaa, waanan boogaadinayaa, waddadan (Berbera Corridor) iyo taa Ceerigaabo oo laba waddo oo muhiim ah bay gacanta ku hayaan, dedaal badan iyo shaqadii oo ay barteen iyo isla qabsi baa ka muuqda."

Ugu dambayntii Waxa uu madaxweynuhu masuuliyiinta wasaaradda Gaadiidka iyo horumarinta jidadka iyo shirkadaha kale ee ku lugta leh jidka Berbera Corridor ku adkeeyey inay hawsha culus ee ay qaranka u hayaan sii laban laabaan, kana midho dhaliyaan himilada guud ee qaranku ka leeyahay dhinaca dhismaha waddooyinka iyo horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha.



Wax Ka Baro Barnaamijka Dibu-Habaynta Maamulka Maaliyadda Somaliland Ee PFM-ka

Nidaamka Maareynta Xogta Maaliyadeed Ee Somaliland (SL-FMIS)

Hargeisa, July 1, 2020 (W.H.M) - Dawladda Somaliland waxa ay anxsixisay Tubta Dib-u-Habaynta Maamulka Maaliyadda (2013-2017) ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda, taas oo loogu talo galay in kor loogu qaado awoodda iyo nidaamyadda maamulka maaliyadda ee dawladda, si loogu adeegsado hanaan ka suuban ee Maaraynta Maalka Dawladda, isla markaana looga midho dhaliyo yoolka Qorshaha Horumarinta Qaranka iyo Hiigsiga 2030.

Ujeeddadu waa sidii loo xaqiijin lahaa sidii Dawladda Somaliland ugu maamuli lahayd maaliyadda Dawladda si heer sare ah, wax ku ool ah, banyaal ah oo isla-xisaabtan ku dheehan yahay. Sidoo kale Tubta Dib-u-Habaynta Maamulka Maaliyaddu waxay suurtogelinaysaa in si buuxda ay isula jaanqaadaan isla markaana is-kaabaan nidaamyadda kala duwan ee hirgelinta dib-u-habaynta maamulka maalidaddu. Hadaba iyadoo taa laga duulayo waxa la yagleelay Nidaamka Maaraynta Xogta Maaliyadda ee "IFMIS".

Halkan hoose ka daalaco xogo dheeraad ah oo ku saabsan Nidaamka Maaraynta Xogta Maaliyadda ee "IFMIS":-







Buuga Xogsidaha Cashuuraha

kale ee aan cashuurta ahayn ee khasnadda dawladda lagu cayimay.

f. Iyo wixii kale ee lagu ansixiyo miisaaniyadaha dalka

4. Waa maxay ilaha dakhliga dawladdu?

Ilaha dakhli ee dawladdu waa, ilo-dakhli oo cashuureed iyo ilo dakhli oo aan cashuur ahayn. Dakhligu waa cashuuro, takaaliifaad, ajuurooyin, ganaaxyo, ama lacago kale oo xeerka dakhliga cashuuraha berrigu soo rogay ama lagu soo ururiyey, iyo qodobadda gaarka ah ee xeerarka ay dhigeen.

5. Waa maxay kharashaadka lagu ogol yahay iyo kuwa aan lagu ogoleyn?

Kharashaadka lagu ogol yahay:

a) Dhammaan kharashaadka iyo khasaaraha uu galay qofku ama cashuur- bixiyuhu inta lagu jiray sannad dakhliyeedka waxaa shardi ah in kharashkaasi iyo khasaarahaasi uu khuseeyo hawlaha sannad dakhliyeedkaasi oo kaliya

Kharashaadka aan lagu ogoleyn:

a) Kharash kasta iyo khasaare kasta oo ka baxsan dakhli sannadeedka ganacsiga ee sannadkaas sida mid qoys, raasamaal, cashuur la bixiyay ama Ganaax ciqaabeed, ama caymis iyo magdhaw Heshiis, hadiyadii iyo deeqii aad adigu bixisay IWM.

6. Waa kuma qofka ay cashuuri ku waajibtey?

Waxaa ay cashuuri ku waajibtay qof kasta oo shaqsi ah, shirkad, amaano-haye, is-kaashato, sanduuqa hawl-gabka, kuwaas oo dalka degan ama se aan degenayn balse dakhli ka soo galo gudaha dalka Jamhuuriyadda Somaliland.

04 XOGSIDAHA CASHUUR BIXIYAHA

UTUBKA 2aad XAFIISYADA CASHUURAHA BERRIGA

1. Xaggee ayey ku yaallaan xafiisyada cashuuraha berrigu?

Xafiisyada Cashuuraha berrigu waxa ay ku yaallaan, Hargeisa, Burco, Boorama, Berbera, Ceerigaabo, Laascaanood, Gabiley, Wajaale, Caynaba, Ceel-Af-weyn, Baligubadle iyo guud ahaan degmooyinka dalka oodhan.

2. Wakhtigee ayey shaqeeyaan xafiisyada cashuuraha berrigu?

Xafiisyada Cashuuraha berrigu waxa ay shaqeeyaan, 7:00 subaxnimo ilaa 2:00 duhurnimo. Sidoo kale waxaa jira xafiisyo cayiman oo gelinka dambe shaqeeya dhammaan gobollada dalka.

3. Ciwaannadee ayaan kala xidhiidhi karaa xafiisyada cashuuraha berriga?

AdressCiwaannada aad kala xidhiidhayso Xafiisyada Cashuuraha berriga waxaad ka helaysaa lifaaqa shaxda ah ee ku yaal bogga u danbeeya (page number 37)

TAX Info

4. Xaggee ayaan ka heli karaa xog ama macluumaad cashuureed?

Waxa aad xog ama macluumaad aad ka heli kartaa dhamaan xafiisyada Cashuuraha Berriga ee gobol kasta. Sidoo kale waxaad xog ka heli kartaa xafiisyadan kala ah:

1. Xafiiska Xogsiinta Cashuur-bixiyaha ee Xarunta Cashuuraha Berriga TEL: 3535, Email: Info@slmof.org, Web: www.slmof.org.
2. Xafiisyada Xogsiinta Cashuur-bixiyaha ee Xarumaha Degmooyinka Gobolka Maroodi-jeex
3. Xafiiska Xafiiska Xogsiinta (One Stop Shop) ee ku dhexyaala Wasaaradda Ganacsiga, Wershadaha iyo Dalxiisa.
4. Xafiiska Cashuuraha Berriga ee Rugta Ganacsiga

La Soco.....

Waaxda Baadhista Ee Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Oo Loo Qabtay Tababar Ku Saabsan Haalbeegyada Caalamiga Iyo Anshaxa Saraakiisha Hanti-Dhawrka Gudaha

Hargeisa, July 01, 2020 (W.H.M)- Saraakiil ka tirsan Waaxda Baadhista ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL ayaa tababar mihiim u ah shaqadooda loogu qabtay 29/04/2020 hoolka tababarada Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda, tababar kaas oo ku saabsan Haalbeegyada Caalamiga ee Hanti-dhawrka Guduhu wax ku baadho (International Standards For internal Audits).

Tababarkan mihiimka ah ayaa waxa ka faaiidaysiay 8 Sarkaal oo noqonaya Tababarayaal uu yeelanayo Xafiiska Hanti-dhawraha Gudaha.

Waxa sidoo kale tababarkaas halbeegyada caalamiga ah ee hantidhawrka gudaha garab socday tababar kale oo ku saabsan Anshaxa laga rabo sarkaalka

baadhaha ah (Code of Ethics of Internal Auditors). Ababarkan ayaa waxa uu socday Muddo bil ah, waxaanu Tababarku baxayey usbuuciiba hal Maalin, iyagoo khubaradii Tababarkaasi bixinayey ay ku baxinayeen casharada nidaamka onlineka.

Wasiirka H. Maaliyadda Jsl Oo Balanqaadyo U Sameeyay Ganacsatada Yar Yar Ee Uu Saameeyay Covid19-ku

Hargeisa, July 01, 2020 (W.H.M) - Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL Dr Sacad Cali Shire ayaa 25-kii bishii April sanadkan shirjaraa'id oo uu ku qabtay xafiiskiisa kaga warbixiyay qorshe ay wasaaraddu ku taakulaynayso ganacsatada yar yar ee uu saameeyay xanuunka COVID-19, iyadoo ay shirkaasi ku weheliyaan wasiirkii ku xigeenka wasaaradda Md Muuse Ibraahin Salaf iyo Agaasimaha guud ee wasaaradda horumarinta maaliyadda Md Maxamed Cabdi Gurxan.

Wasiir Sacad waxa uu sheegay in xukuumadu go'aansatay inay qiimo dhimis cashuureed loo sameeyo boqolkiiba labaatan (20%) raashinka daruuriga ah, raashinka oo ay ka mid yihiin daqiiqda, bariiska, saliida, sonkorta iyo baastada waxaa kale oo ay dawladu samaysay sanduuq loogu talo galay in lagu taakuleeyo dadka dhibaatada dhaqaale ka soo gaadhay xanuunka COVID-19, sanduuqaa waxay ku talo gashay inay ugu tabarucdo hal milyan oo dollar ($1,000,000) waxaa kale oo dawladu samaysay sanduuq lagu taakuleeyo ganacsatada yar yar

ee ganacsigoodu kaga baaba'ay ama kaga diciifay intii xanuunka ina soo galay, sanduuqaana waxay dawladu ku shubaysa hal milyan oo dollar ($1,000,000) waxaa kale oo dawladdu ku shubaysaa sanduuq ay hore u samaysay ee loogu talogalay la dagaalankii u diyaar garawga xanuunka COVID-19 hal milyan oo dollar ($1,000,000) iyadoo hore lagu shubay shan boqol oo kun oo dollar ($500,000) waxaa kale oo dawladdu go'aansatay inay cashuur dhaaf u samayso waxkasta oo dawo ama la xidhiidha la dagaalanka xanuunka saf marka ah ee COVID-19 sidaas darted waxay dawladdu ku dhiirigalinaysaa muwaadiniinta oo dhan inay sako iyo sadaqo kaga qayb qaataan sanduuqa loogu talogalay dadka ku saboloobay xanuunkan COVID-19 waxay dawladdu ka codsanayaa ku boorinaysa ku adkaynaysaa baananka iyo shirkadaha waawayn inaanay macaamiishooda ay daynta ku leeyihiin ku culaysin bixinta daynta oo ay wakhti dheer siiyaan maadama xaaladu ku adagtahay waxa kale oo dawladdu ku dhiirigalinaysa baanaka iyo mashaariicda daynta bixiya inay ka khafiifiyaan macmiishooda shuruudaha ay ku xidhaan dayn qaadashada waxaan kale oo aan doonayaa anigoo fursadan ka faaidaysanaya ugu baaqo muwaadinkasta oo Somaliland ah halkuu doono ha joogo guddo iyo dibadba inu ka qayb qaato sanaaduuqda loogu talogalay inay lagu taakuleeyo dadka masaakiinta ah iyo ganacsatada yar yar ee dhibaatadu soo gaadhay iyo sanduuqa loogu talogalay in lagu la dagaalamo xanuunka COVID-19.

Shaqaalaha Wasaaradda Maaliyadda Ee Gobaladda Galbeedka Iyo Barriga Dalka Oo La Gaadhsiiyey Agabka Ka Hortaga Xanuunaka COVID-19 ka

Hargeisa, July 01, 2020 (W.H.M) - Agaasimaha Waaxda Shaqaalaha Wasaaradda Horumarinta maaliyadda JSL Maxamed Axmed Wayrax iyo Agaasime ku xigeenka Waaxda xidhiidhka dadwaynaha iyo Xogta Naasir Aadan Maxamed ayaa shaqaalaha xafiisyada Wasaaradda ee gobolada galbeedka iyo bariga gaadhsiiyay agabka ka hortaga xanuunka safmareenka ah ee COVID-19.

Waftiga saraakiisha ah ee uu hogaaminayey Agaasime Wayrax ayaa iyagu xafiisyada gobolada galbeedka ee Gabiley, Awdal iyo Salal gaadhsiiyey 25 bishii April sanadkan, halka uu isla taariikhdaasi saraakiil uu hogaaminayo Agaasime ku xigeenka waaxda xidhiidhka dadwaynuhu isaguna gobolada Saaxil, Togdheer, Saraar, Sool iyo Sanaag ay agabka ka hortaga xanuunka Coronavures gaadhsiiyeen shaqaalaha wasaaradda horumarinta Maaliyadda ee goboladaasi.

Sidoo kale arintan ayaa kusoo beegmaysa xili shaqaalaha wasaaradda horumarinta maaliyadda ee gobolada iyo degmooyinka dalka iyaga looga maarmi waayey inay qaranka u shaqeeyaan wakhtigaasi adag, isla markaana si loo ilaaliyo badqabka shaqaalaha wasaaradda ee gobolada oo dhan ayaa qalabkaasi la gaadhsiiyey, kuwaasi oo xafiisyadooda lagu siiyey fariimo wacyigalin ah oo ku taxaluqa qaabka ay iskaga ilaalinayaan xanuunka COVID 19 ee dunida jahareerka ku riday, iyadoo dhamaan madaxda cashuuraha bariga iyo kastamada ee goboladaasi ay kala gudoomeen madaxdaasi qalabkaasi oo iskugu jiray Facemask, Golofisyo, alkolka faraha la marsado iyo agab kale oo wacyigalin ah.

Agabkaas gobolada la gaadhsiiyey ayaa waxa Wasaaradda ugu deeqday hay'ada OBM ee wada shaqaynta la leh wasaaradda maaliyadda. Ugu horayn Agaasimaha waaxda cududa shaqaalaha Mr Wayrax oo isagu maalintaasi warbixni warbaahinta ku siiyey xafiiska agaasimaha cashuuraha ee magaaladda Boorama ayaa waxa hadaladiisii ka mid ahaa "Runtii aad ayaanu ugu mahadnaqayna waa alaab ay noo keenen wakhtigii loo baahna, waxaananu ku wareejinaynaa madaxda wasaaradda ee gobolka oo aanu ka rajaynayno inay si fiican ugu wacyigaliyaan shaqaalaha, isla markaana ilaaliyaan badqabka shaqaalaha".

Dhinaca kale Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL iyadoo ka duulaysa kaalinteeda wacyigalineed waxa ay guud ahaan bulshada iyo shaqaalaheedaba ku wacyigalinaysaa inay is ilaaliyaan oo ay ka taxadiraan goobaha bulshadu isugu timaado, maadaama caabuqa Corona virus (Covid-19) dunida si xawli ah ugu fidayo, iyadoo sida aynu ognahayna uu dalkeena ka jiro safmareenka Covid-19.

Hadaba waxaa laydin ku adkaynayaa inaydun u dhaga nuglaataan tilmaamaha wacyigalinta ee ay bixinayaan Wasaaradda Caafimaad-ka, Culima Aw Diinka iyo Gudida Qaran ee Covid-19.

Waxaana mudan in mar walba maanka lagu hayo tilmaamahan:

- Faraxal joogto ah, adiga oo isticimaalaya biyo iyo saabuun
- Jooji salaanta gacan qaadka ah
- Marka aad qufacayso dabool afka iyo sanka adiga oo isticmaalaya masar ama soft, amaba cududaada ku dabool sanka iyo afka
- Kala fogaada markaad joogtaan goobaha shaqadda iyo meelaha kale ee la isugu yimaado
- Hadii aad dareento xumad iyo qufac ka baaqo shaqada ama meelaha dadku isugu yimaadaan sida iskuulada, sariibadaha iyo goobaha la mid ah, isla markaana adiga oo gurigaaga jooga garaac lambarka heeganka caafimaadka ee 988.

Madaxwaynaha Somaliland Oo Tababar Usoo Xidhay Dufcadii 2aad Ee Barnaamijka Shaqo Qaran Oo Mihiimad Wayn Ugu Fadhiya Qaranka

Barnaamijkan Carbiska Shaqo Qaran Ayaa Laga Maalgaliyey Miisaaniyadda Qaranka

Hargeisa, July 01, 2020 (W.H.M)- Madaxwaynaha JSL Md. Muuse Biixi Cabdi ayaa deegaanka Dararwayne 1/06/2020 tababar ugu soo xidhay Dufcadii 2-aad ee Shaqo Qaran, kuwaas oo tiradoodu dhamayd 456, iyadoo laga soo kala xulay dhalinyaradaas oo rag iyo dumarba iskugu jira dhamaan Gobolada iyo Degmooyinka Dalku ka kooban yahay.

Madaxweynaha ayaa markuu soo gaadhay Dugsiga Carbiska Shaqo Qaran ee Dararweyne, waxaa salaan ciidan siiyey dhalinta tababar-ka loo soo xidhayey, kuwaas oo si fiican loo jareeyey isla markaana hubqaad-kooda iyo haykal-kooda ciidan jibo ku galinayey.

Madaxweynaha ayaa intaanu galin madasha loo asteeyey qalin-jabinta wuxuu daawaday dhoolatus gaardis ah oo ay si farshaxanimo ka muuqato u soo bandhigeen. Waxa Madaxdweynuhu sidoo kale tagay guryaha ay dagan yihiin, suuliyada iyo meelaha cuntada loogu diyaariyo, si uu ugu kuur galo xaaladooda faya-dhawr, taas oo muujinaysa heerka ay gaadhsiisantahay lexejeclada uu u hayo da'yarta xulka ah ee

Barnaamij-kan oo uu hindisihiisa lahaa Madaxweynaha Somaliland Md Muuse Biixi Cabdi, wuxuu noqday hal abuur najaxay, waxaanu ka mid yahay siyaasadaha xukuumada talada haysa u adeegsanayso sidii ay shaqo ugu abuuri lahayd dhalinta wadanka, isla markaana looga faaiidaysan lahaa cududa dihin ee da'yarta Dalka. Marka laga yimaado casharada jidh dhiska iyo layliska sarkaal nimo, waxa dhinac socda duruus kale oo tiro badan, kuwaas oo ay ka mid yihiin: kuwa la xidhiidha barashada qaabka dhismaha Dawlada, xeerarkiisa, kala saarista xaqa iyo waajibaadkiisa (Civic Education), casharo lagag kaalmaynayo shaqo helida, barnaamijyo lagu hanuuninayo dal jacaylka iyo didaaca ciida hooyo, iyo kuwo la hal maala oo wax ka tari doona hour socodka dhalintaas.

Waaxda Cashuuraha Berriga Wasaaradda H. Maaliyadda JSL : Su'aalo Iyo Jawaab-Celinta Nidaamka Bixinta Cashuurta Macaashka Ganacsiga

SU'AAL IYO JAWAAB-CELIN NIDAAMKA BIXINTA CASHUURTA MACAASHKA GANACSIGA

SN	SU'AAL	JAWAAB
		XILIGA BIXINTA CASHUURTA MACAASHKA GANACSIGA
1	Goormay waajibtaa/bislaataa bixinta Cashuurta Macaashka Ganacsiga?	Sida ku cad Qod 7aad ee Xeerka Dakhliga 72/2016, Cashuurta Macaashka Ganacsigu waxay waajibtaa/bislaataa bilowga sanad miisaaniyadeed kasta.
		WAAJIBAADKA CASHUUR-BIXIYAHA
2	Waa maxay waajibaadka saaran cashuur-bixiyahu?	Sida ku cad Qod 135aad, ee Xeerka Dakhliga 72/2016, Waxaa waajib ku ah cashuur-bixiyaha in uu keeno xisaab-celin ugu danbayn 30 April ee sanadkasta , taas oo waafaqsan Shuruudaha looga baahan yahay, kana mid yihiin:- 1) Sida ku cad Qod 135aad (3) Xisaabcelinta Dakhliga waxa saxeexaya Cashuur bixiyaha ama Wakiilkiisa , waana in ay sax tahay islamarkaana dhamaystiran tahay. 2) Sida ku cad Qod 135aad (5) ee Xeerka Dakhliga 72/2016, Cashuur bixiyuhu waa inuu soo raaciyaa xisaab celinta dakhliga la soo gudbinayo cadayn muujinaysa dakhliga iyo kharashka hawsha ganacsi iyo cadayn muujinaysa hantida iyo qaanta.
		WAAJIBAADKA WAAXDA CASHUURAHA BERRIGA
3	Waa maxay waajibaadka saaran Waaxda Cashuuraha Berriga, iyo muddada u xadidan qiimeynta?	Sida ku cad Qod 137aad, ee Xeerka Dakhliga 72/2016, Xafiiska Cashuuraha wuxuu Hubinayaa dakhliga cashuurtu ku waajibtay ee cashuur bixiyaha oo ku salaysan xisaab celinta dakhliga ee cashuur bixiyaha iyo xog kasta oo kale ee Cashuurta waajibtay sanad dakhliyeed, in la xaqiijiyo dakhligaas waxay ku siman tahay Shan **(5)** sano gudahood laga bilaabo maalintii xisaab celinta la keenay.
		QIIMEYNTA CASHUURTA MACAASHKA GANACSIGA
4	Waa maxay shuruudaha samaynta qiimeynta cashuurta macaashka?	Sida ku cad Qod 137aad ee Xeerka Dakhliga 72/2016, Shuruudaha qiimeynta Cashuurta Macaashka Ganacsigu waa Haddii :- a) Sida ku cad Qod 137aad (2,a) ee Xeerka Dakhliga 72/2016, (Cashuur bixiye ka baaqsado inuu keeno xisaab celinta sanad dakhliyeedka ama
		b) Sida ku cad Qod 137aad (2b) Xeerka Dakhliga 72/2016, (Xafiiska Cashuuraha hadii ku qanci waayo xisaab celinta dakhliga sanad dakhliyeedka ee cashuur bixiyuhu soo gudbiyay)
		TALAABOOYINKA BIXIN LA'AANTA CASHUURTA MACAASHKA GANACSIGA
5	Waa maxay talaabooyinka ka dhalan kara bixin la'aanta cashuurta waajibtay ee la bixin waayay wakhtigeeda?	Sida ku cad ee Xeerka Dakhliga 72/2016,, Bixin la'aanta cashuurta waajibtay waxaa ka dhalan kara "Talaabooyinka Khasab Ku-ururinta oo noqon kara sidan soo socota:- 1. Qodobka 9aad Xeert Lr 72/2016 ee xeerka dakhliga waxaa uu tilmaamaya inaan loo cusboonaysiin Karin ganacsadaha liisanka hadii aanu bixin Cashuurihii ku waajibay taaso shardi ay u tahay warqada Cadaynta Cashuur la'aanta. 2. In lagu oogo ciqaabaha ku xusan Xeerka dakhliga ee u hogaansanan la'aanta waajibaadka iyo awaamiirta Cashuur soo celinta ama soo xaraynta si waafaqsan **Qod 18 ee xeer Lr 72/2016**. 3. Ganaax lacageed, xayiraad, xaraash iyo damaanad galinta Hantida ganacsadaha Cashuurtu ku waajibtay si waafaqsan Qodobada **11aad**, **14aad** ee Xeer Lr 72/2016.
		GANAAXYADA CASHUURAHA
6	Waa maxay ganaaxa haddii aan la is diiwaangelin?	Ganaaxa marka aan la isdiiwaangelin waa **US $ 2000** iyo **Hal sano** Xadhiga ama Labadaba.
7	Waa maxay ganaaxa marka si khaldan loo isticmaalo lambarka aqoonsiga cashuur-bixiyaha 'TIN'?	Ganaaxa ka dhalana marka si khaldan loo isticmaalo TIN-ku waa **US $ 2000** iyo **1 Hal sano**.
8	Waa maxay ganaaxa marka aan xiligeeda lagu bixin cashuurta macaashka shaqaalaha, macaashka Ganacsiga iyo Daaraha?	Ganaaxa ka dhalanaya marka aan wakhtigeeda lagu bixin Cashuurta macaashka shaqaalaha, macaashka Ganacsiga iyo Daaraha waa **(2% boqolkiiba laba)** wadarta Cashuurta Waajibtay
9	Waa maxay ganaaxa ka dhalanaya haddii aan la keenin ama lasoo gudbin xog haboon dhukumentiga xogta xisaabeed ee cashuurta la xidhiidha?	Ganaaxa ka dhalanaya soo gudbin la'aanta dhukumentiga cashuurta waa **$1,500** ama xadhig aan mudadiisu ka yarayn **hal sano**.
		AWOODAHA BAADHISTA WAAXDA CASHUURAHA BERRIGA
10	Waa maxay awoodaha baadhista ee Waaxda Cashuuraha Berriga?	Sida ku cad Qod 39aad ee Xeerka Dakhliga 72/2016, waxaa awood uu u siinayaa inay gali karaan baadhi karaan dukmenti kasta sida fiylasha, computer, iyo waxkasta oo u dhigma sida Ganaax lacageed, Xayiraad, Xaraash &IWM si sharciga waafaqsan.

waaxdu mudadii ay jirtay oo kooban hadana ku guulaysatay hawlo wax ku ool ah oo ay mid yihiin cilmi baadhis ay ku samaysay tayada iyo qiimaha alaabooyinka ay wasaaradu iibsato ee ay ka midka yihiin: Qalabka dayactirka gaadiidka, Qalabka xafiisyada, Stationaryga iyo shidaalka.

Iyadoo ay waaxdu cilmi baadhistaa ka dib ay isbedel weyn oo guud ahaan laga dareemay wasaarada ka samaysay tayada iyo qiimaha alaabooyinka ay wasaaradu iibsato.

Sidoo kale waxay waaxdu kormeer iyo qiimayn ku soo samaysay baahida dhisme iyo dayactir ee ay qabaan xafiisyada gobalada iyo degmooyinka ee wasaarada horumarinta maaliyadda.

Kormeeradii qiimaynta ahaa iyo cilmi baadhis ka dib waxay waaxdu casriyayn ku samaysay nidaamka ay waaxaha iyo xafiisyada wasaaradu u soo dalbadaan baahiyahoooda, iyadoo ay Waaxuhu ku soo dalbadaan baahiyahooda hab electronic ah (procurement module).

Habkan oo ah hab electronic ah oo isku xidhaya xafiisyada waaxaha, Xafiiska Agaasimaha Guud, Xafiiska Waaxda Iibka iyo Macaamiisha ay wasaaradu wax ka iibsato.

Nidaamkan cusub oo qayb ka ah Barnaamijka Dib-U-Habaynta Maamulka Maaliyadda JSL ee PFM Iyo Nidaamka Maaraynta Xogta Maaliyadda Ee 'IFMIS' ayaa ah mid u fududeeyey waaxaha wasaaradu habka ay u soo gudbistaan baahiyahooda iyadoo ay mudo aad uga kooban wakhtigii hore ay helaan jawaabta baahiyahoodaba.

Sidoo kale waxay waaxdu hirgelisay nidaamka maamulka gaadiidka kaas oo lagu kaantaroolo baahida badan ee ka timaada dayactiristа gaadiidka (Vehicle repairing management Database).

Sidoo kale waxay waaxdu waxbadan ka qabatay xaga dhismayaasha iyadoo ay maalinwalba baahida xafiisyo cusub oo ay wasaaradu ku yeelato gobolada iyo degmooyinku ay sii kordhayaan kuwaas oo ay fulintooda iyo dayactirka kuwii horeba ay waaxdu ka hawlgasho.

Isla mar ahaantaas waxay waaxdu diyaarisay nidaamka qiimaynta ee hawlaha dhismayaasha Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL, kaas oo bixiya bayaan cad oo qeexaya shaqada la qabanayo iyo miisaaniyadeedaba.

Nidaamkan cusubi waxa uu ka caawiyey wasaarada in ay ka fogaato qiimayaasha aan daruuriga ahayn ee ay soo diyaarsadaan qandaraaslayaasha fulinaya hawlaha dhismayaashu, sidoo kale waxay waaxdu kor u qaadis ku samaysay tayada dhismayaasha ay wasaaradu dhisato iyo qaab dhismeedkoodaba.

Qorshayaasha Waaxda

Waxaa jira hawlo badan oo u qorshaysan Waaxda Iibka mudada gaaban iyo mudada dheerba kuwaas oo ay doonayso in ay waaxdu ku talaabsato mustaqbalka waxaana ka mid ah,

A: in ay waaxdu isbedel weyn iyo casriyayn ku sii samayso nidaamka iibka wasaaradda

B: in ay waaxdu isbedel lataaban karo ka samayso casriyeynta dhismayaasha wasaarada ee gobolada iyo degmooyinka oo ay hada ka jiraan cidhiidhi badan iyo qaar uu ka muuqdo gabaw aad u farabadani oo u baahan in dib u dhis lagu sameeyo.

C: Iyadoo ay wasaaradu sii balaadhanayso maalinba maalinta ka dambaysa in ay waaxdu isbedel ka samayso noocyada gaadiidka ay hada isticmaasho wasaaradu oo ay keento gaadiid ku haboon shaqada iyo shaqaalaha wasaarada.

Agaasimaha Waaxda Iibka Marwo Bahja Xasan Yuusuf.

Markii uu soo dhamaystay Madaxdweynuhu kormeerkiisa waxa ku soo dhaweeyey madasha qalin jabinta Agaasimaha Dugsiga Carbiska Shaqo Qaran Md. Maxamed Xuseen Cusmaan (Mu- adinka), isagoo madaxweynaha ku amaanay hindisaha barnaamij kan la mahadiyey ee midha dhalka noqday, waxaanu sharaxaad waafiya ka ka siiyey guud ahaan arimaha Dugsiga, maamul ahaan waxa u qabsoomay iyo waxa u qorshaysan, iyo kaadirka labaad ee shaqo qaran ee loo soo xidhay tababarka. Waxaana intaa ka dibna Madaxweynaha JSL ayaa barbaarta ka aflaxday Dugsiga oo ahaa Dufcadii labaad ee Shaqo Qaran ku tilmaamay keyd uu qaranku leeyahay oo markii loo baahdaba u diyaar ah samata bixinta dalkooda isagoo tilmaamay in maanta waajib culusi saaranyahay. Waxaana ka mid ahaa hadaladiisii " Laga bilaabo maanta waxa aad ka mid tihiin ciidanka qaranka oo ciidan kayda ayaad tihiin, ma tihidiin dad shicib ahoo madax banana, wiilal iyo gabdhaba kaydka ayaad ku jirtaan, marka la idiin baahdo ee dhibaato dhacdana waxaad tihiin mutadawiciinta ugu horeeya", hadaladaa dhiiri-galinta iyo dardaaranka iskugu jira kadib Madaxweynaha Jamhuuriyadda ayaa shahaadooyinkooda gudoonsiiyey Barbaarta Shaqo Qaran. Ugu danbayn barnaamijka Carbiska Shaqo Qaran ee uu Madaxwaynaha JSL Dugsiga Carbiska Shaqo Qaran ee Deegaanka Dararwayne ku yaal kusoo xidhay ayaa guud ahaan laga maalgaliyey Miisaaniyadda Dawlada, isla markaana waxa uu fursad shaqo abuur u noqday Dhalinyaro tiro badan.

Muwaadin Wax ka barro Noocyada Tacriifadaha

1.1.5 CASHUURTA GADISTA (GST)

s/n	Cashuurta Gadista/ Iibka	5%

1.2 CASHUURAHA XEERARKA GAARKA AH KU AASAASAN

1.2.1 CASHUURTA DIIWANGELINTA (REGISTRATION)

#	Faahfaahin	Rate
	Qaan-sheegtooyinka (Invoices)	5%
	Heshiisyada (Agreements)	3%
	Kirada Baabuurta	3%
	Cusboonaysiinta Heshiisyada	1%
	Cusboonaysiinta (Rahanka)	1%
	Cashuurta Kala Wareejinta Hantida ma guurtadda ah	2%
	Cashuurta Kala Wareejinta Baabuurta	Fixed rate
	Hibeynta	1.5%

1.2.2 CASHUURTA MOORKA (STAMP)

S/N	NoocaCashuurta	Xadiga Cashuurta
1	Cashuurta Shaqaalaha	1%
2	Qaansheegooyinka,	2.74%
3	Dhamaan Cashuuraha kale	2.5%

1.3.3 CASHURTA TIGIDHADA

S/N	Nooca Tigidhadda	Ujeedada
1	20,000 (Green)	Shatiga ganacsi, Shahaadoyinka
2	10,000(brown)	Warqada danbi la,aanta, biilasha ,warqadda ogolaanshaha cashuur dhaafka iwm
3	5000(red) 1000(blue)	Codsiyadda iyo qaansheegooyinka cashuurdhaafka
4	1000(blue)	

Nuxurka Waxyaabihii U Qabsoomay Mudadii Koobnayd Ee Ay Jirtay Waaxda Iibka ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL

Hargeisa, July 1, 2020 (W.H.M) - Waaxda Iibka ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL oo ah waax cusub oo la aas aasay aakhirkii sanadkii 2019, isla markaana ka mid ahaan jirtay Waaxda Maamulka ayaa ka dib markii uu arkay Wasiirka Wasaarada Horumarinta Maaliyadda JSL Dr Sacad Cali Shire baahida weyn ee ay wasaaradu u qabto cid ka haqabtirta baahida iibka iyo dhismayaasha ee ay qabaan xafiisyada gobolada iyo degmooyinka ee maalinba maalinta ka dambaysa sii kordhaya ayuu go'aan saday inuu abuuro Waax cusub oo u qaabilsan wasaaaradda maaraynta iibka, taas oo dhamaan waaxaha kala duwan ee wasaaradda ka jawaabta baahiyahooda dalabaadka Iibka. Sidoo kale Waaxda iibku ayaa ah waax mihiim ah oo ay leeyihiin wasaaradaha maaliyada ee caalamku, sidaas darteed si loo dhamaystiro nidaamka ay u dhisanyihiin wasaaradaha maaliyada ee caalamku waxa mar labaad muhiim noqotay abuurista Waaxdan. Hadaba mudadii gaabnayd ee ay jirtay Waaxda iibka ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadu waxay si wanaagsan ula jaanqaaday Nidaamkan cusub ee Procurement Module-ka, iyadoo

WAXBARASHADA

Muwaadin waxbarashada ka dhisani waxa uu u yahay lafdhabar Qaran waxsoosaar leh oo bar-waaqo-u-jeed ah. Miisaaniyadda 2020 waxa ay siisanaysaa mudnaanta ay leedahay helitaanka adeegyada waxbarasho oo la sii horumariyo. Waxa uga qoondaysan miisaaniyadda waxbarashada SIShs 196.9 oo u dhiganta in 31% kor looga soo qaaday qoondadii 2019.

Korodhsiimadan waxa lagu maalgelinayaa:

- Korodhsiimada mushaharka macxallimiinta dugsiyada hoose/dhexe qader dhan 25% iyo qoritaanka 300 oo macallin oo cusub.
- Kor-u-qaadidda tayada xarumaha tababarrada macallimiinta
- Dhismaha 6 dugsi iyo 3 maktabadood oo gobollada ah



Waxa dawladdu qaadanaysaa mas'uuliyadda qoondada ay ku leedahay mashaariicda horumarinta waxbarashada ee Dayaxa iyo Laascaanood oo uu taageero Sanduuqa Horumarinta Somaliland (SDF).

BIYAHA IYO FAYODHAWRKA

Helitaanka biyo nadiif ahi waxa uu muhim u yahay caafimaadka iyo fayoqabka muwaadiniinta Somaliland. Misaaniyadda 2020 waxa ay diiradda saari doontaa biya-yaraanta dalka ka jirta.
SlShs 28.8 bilyan ayaa loo qoondeeyey biyaha, fayadhawrka oo la mid ah in 64% korodhsiimo ah lagu sameeyey qoondadii 2019.

Hawlaha muhimka ee qorshaysan wax aka mid ah:

- Dhismaha laba dhaam oo waaweyn
- In Oodwayne, Maroodi iyo Awdal laga kala dhiso 3 dhaam, iyo saddex warood oo laga kala dhisayo Sool, Sanaag iyo Saaxil
- Laba ceel oo laga qodo Kulaal aiyo FiqiFuliye, iyo iibka riig

DEEGAANKA

Ilaalinta deegaanka iyo duurjoogtu waxa ay kaalin daruuri ah u leeyihiin faca manta jooga iyo kan soo socdaba. Waxa uga qoondaysan deegaanka SlShs 25.4 bilyan Miisaaniyadda sannadka 2020, oo u dhiganta in 8% lagu kordhiyey qoondadii 2019.

Hawlaha horumarineed ee qaybtan u qorshaysan, wax aka mid ah:

- Dhir-beerid
- Ilaalinta duur-joogta
- Kordhinta ilaalada deegaanka iyo kaymaha
- Samaynta Seere u gaar ah duurjoogta oo laga hirgeliyo Bancawl iyo Cashuura
- Ka hor tagga masiibooyinka dabiiciga ah.

LaSoco.....

Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda
Jamhuuriyadda Somaliland

1.2.4 CASHUURTA MAAMULKA (ADMINISTRATION)

S/N	Nooca Cashuurta	Xadiga Cashuurta
1	Cashuurta shaqaalaha	0%
2	Cashuuraha kale oo dhan	2%

1.3 AJUUROOYINKA WASAARADDAHA QARANKA

1.3.1 WASAARADDA GANACSIGA, WERSHADAHA, & DALXIISKA

1.3.1.1 AJUURADDA RUQSADDA LIISAMADA GANACSIGA EE ADEEGAYADA

	Nature of Enterprise	Local (Muwaadin)	Foreign (Ajanabi)		
No	Type of Service License	Sole ($)	Partnership ($)	Sole ($)	Partnership ($)
	Museum and Trade Fair				
	ank Registration Fee	$150	$150	$200	$200
	Money Exchangers	200	300	---	----
	Miscepllaneous Service				
	Laundries (Dry Cleaning)	100	200	-----	-----
	Metal Workshop	100	200	----	----
	Poultry Farms	300	500	800	1200
	Travel Agency	150	300	1,000	2,000
	Tourism Agency	150	300	2,000	3,000
	Printing Service	$150	$300	$1,000	$2,000
	Publishing Service	$300	$500	$1,000	$2,000
	Shipchender Service	$150	$300	$1,000	$2,000
	Container Cleaning Service	$300	$400	$1,000	$1,500
	Banquet Hall	200	300	-----	----
	Decorations	250	400	500	1000
	Health Service				
	Large Sized Hospitals	$600	800	$3,000	$4,000
	Recruitment And Training Service	$ 150	$ 300	$ 1,000	$2,000

La Soco.....

Cashuurta Laga Reebayo Ma-Daganayaasha (Withholding Tax)

Cashuurta la reebayo ee ajaanibka (Withholding tax) Waa Cashuurta ku waajibtay dadka aan deganayn Dalka balse dakhli aan mushahar shaqaale ahayn, ka hela Gudaha Xuduuda Dalka JSL si kasta haku helo'e; Hadaan si kale u dhigo Cashuurtani waxay qayb ka tahay Cashuurta dakhliga ee loo yaqaaano badanaa Cashuurta Macaashmacaashka Ganacsiga oo ah qaybta Cashuuraha Toosan

Cashuurtani waxa waajibinaya Cutubka 2aad qaybtiisa aad iyo 11 aad ee Xeerka Dakhliga guud Cashuuraha Somaliland Xeer Lr 72/2016

Masuuliyadda Ka reebista Cashuurtaas waxa Xeerku ku waajibinayaa inuu ka reebo waa Cidkasi oo ka ka wakiilka ah ama Xidhiidh macaamilka dhaxeeyo ajaanibka Cashuurtu ku waajibtay Ciddaasi ayaa Xeerku u aqaanaa Wakiil Cashuur reebe

Wakiil Cashuur Reebe:- Waa Qofkasta oo shaqsi ah ama qof sharciya sida Shirkad gaar loo leeyahay, Dawli , Hayadaha samafal caalami ama Muxali; dhamaan dadkaasi haday la macaamilaan dadka ajaanibka ee aan deganayn dalkka ee dakhli Cashuurgal ah ka hela dalka Gudihiisa Waa Wakiil Cashuur reebe

Cashuurtan waxa la bixinayaa bile oo ah bisha xigta bisha Cashuurtu waajibtay ama shan iyo tobanka cisho ee xiga xiliga dhamaadka hawsha ama la helay dakhligaas

Haddii Wakiilka Cashuur reebe ku guuldaraysto inuu ka jaro Cashuurta ku waajibtay dadka aan deganayn dalka ; isaga laftiisa ayay dusha ka fuulaysaa Cashuurtii waajibtay iyo ganaax ka dhashay fulin la'aanta masuuliyadaas

Waxa halkan ku soo Gudbinayaa Noocyada Cashuurta la reebayo iyo tacriiftooda

1. Cashuurta laga reebayo ee ku waajibtay dadka aan dalka deganayni ee dakhli Cashuurgalah ka hela dalka sida :- Dakhliga Saami Faaiido, Royality, kirooyin, Bixin khayradka dabiicaah , khidmada maamulka iyo iwn; waxa laga Cashuurayaa 10% oo ku dhacya dakhliga Guud

2. Cashuurta laga reebayo ee ku waajibtay dadka aan dalka deganayni ee dakhli Cashuurgalah ka hela dalka sida:- Dakhliga adeega qandaraasyada iyo xir-fadlayaasha aqooneed , la taliyayaasha ama heshiish-kasta khidmadeed oo aan ahayn heshiish Cashuurtub waa 10% oo ku dhacaya qiimaha guud

3. Cashuurta laga reebayo ee ku waajibtay dadka aan dalka deganayni ee dakhli Cashuurgalah ka hela dalka sida Dakhliga madadaaliyayaasha iyo ciyaartoyga aan dalka deganayn Cashuurtu waa 10% qiimaha guud dakhligaas

4. Cashuurta laga reebayo ee ku waajibtay dadka aan dalka deganayni ee dakhli Cashuurgalah ka hela dalka sida Dakhliga Gaadiidka Badda , Cirka iyo dhulka Cashuurtu waa 10% Qiimaha guud

Noqo Wakiil cashuur bixiye oo ka bax masuuliyada kaa saaran ka reebista Cashuurta dadka aan dalka deganay ee dakhli ka hela gudaha dalka si aan u noqoto wakiil cashuur reebe wanaagsan laguguna abaal marin doono

ALLAA MAHAD LEH

Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda

Buug-yaraha Miisaniyadda & Muwaadinka Somaliland 2020

AMMAANKA/NABADGELYADA

Mashaariicda qorshaysan waxa ka mid ah :

- Dhismaha isbitaal ciidan, Saldhigga Ciidanka Milatariga Ceerigaabo, 7 rug bilays oo gobolada ah, 3 xabsi oo waaeyn oo kala ah Boorame, Gabiley iyo Sallaxley, rugo dabdemis oo kala ah Berbera iyo Laascaanood;
- Iibka 15 gaadhi-bilays iyo laba baabuur oo Wiish oyo Booyad ah si loo xoojiyo hawl-fulinta bilayska Gobollada;
- Kordhinta Ciidamada ammaanka;
- Ka-kordhinta Miisaaniyadda nabadsugidda qaranka 36.6% intii ay ahayd 2019 si loo ballaadhiyo awoodda ciidanka ee hawlqabadkiisa gudaha iyo dibeddaba;

CAAFIMAADKA

Horumarinta caafimaadka muwaadinku waxa uu ahmiyad u leeyahay badhaadhaha la wadaago ee qaranka. Miisaaniyadda 2020 waxa ay mudnaan siinaysaa kobcinta adeegyada caafimaad si waafaqsan Qorshaha Horumarinta Qaranka II iyo Fogaan-eegga Qaranka ee 2030. Waxa loo qoondeeyey caafimaadka SlShs 96.5 bilyan oo u dhiganta korodhsiimo ah 7% marka loo eego qoondadii miisaaniyaddii 2019.

Tallaabooyinka u qorshaysan in la fuliyo, wax aka mid ah:

- Kordhinta dakhtarro guud iyo kuwo xirfado gaar ah lehba
- Dhismaha 3 goob-caafimaad (2 Hargeysa ah & Oog ah), iyo 9 xarumaha hooyada iyo dhallaanka ah oo gobollada ah
- Kor-u-qaadidda ama dib-u-habaynta saddex goob-caafimaad oo ku kala yaalla Buuhoodle, Badhan iyo Balligubadle iyo 2 xarumaha hooyada iyo dhallaanka ah oo ku kala yaalla Arabsiyo iyo garbo-dadar
- Iibka 9 ambalaas iyo qalabka caafimaadka oo ay ku jiraan mishiinka kelyaha sifeeya oo cusbatalka Boorame ah
- In taageero dhaqaale oo dheeraad ah la taarto takhaatiirta iyo kalkaalisooyinka 7 cusbatal oo qaaxada ah (TB Hospitals) oo ku kala yaalla gobollada

Dawladdu waxa kale oo ay qaadanaysaa qoondada ay ku leedahay mashaariicda caafimaad ee ka socda Ceerigaabo iyo Laascaanood ee laga taageero Sanduuqa Horumarinta Somaliland (Somaliland Development Fund – SDF).

Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda